

JAMHUURIYADDA



SOMALILAND

FAAFINTA RASMIGA AH

SOMALILAND REPUBLIC
OFFICIAL GAZETTE

النشرة الرسمية لجمهورية صوماليلاند

XAFIISKA GARYAQAANKA GUUD EE QARANKA
JSL, HARGEYSA

E-mail: Garyagaankaguud@gmail.com

Sanadka: 5aad

Cadadka: 4aad ee April

Taariikh: 07/05/2016

QIIMAHA CADADKA: SL. Sh.

RUKUNKA (Subscription):

QIIMAHA FAAFINTA AAN DAWLIGA AHAYN ee Qaybta Shanaad:
Sadarkii Boggii kastaaba SL. Sh.

TUSMADA CADADKA

QAYBTA KOWAAD: XEERARKA

BAARLAMAANKA IYO XEER

NIDAAMIYAYAASHA:

Sooma bixin

QAYBTA LABAAD: XEER

NIDAAMIYAYAASHA IYO

DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

1) **XEER MADAXWEYNE :**

Joojin kharashyo

335

2) **XEER MADAXWEYNE Lr : 0624/042016**

Beddel

338

3) **XEER MADAXWEYNE Lr : 0625/042016**

Beddel

339

4) **XEER MADAXWEYNE Lr : 0626/042016**

Beddel

340

5) **XEER MADAXWEYNE Lr : 0627/042016**

Mgacaabid	341
6) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr : 0628/042016	
Magacaabid	342
7) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr : 0629/042016	
Magacaabid	343
8) <u>XEER MADAXWEYNE</u> Lr: 0631/042016	
Cafis Madaxweyne	344
<u>QAYBTA SADEXAAD:</u>	
DIGREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,	
AMARADA & XEER	
NIDAAMIYAYAASHA WASIIRADA,	
IWM	
<u>QAYBTA AFRAAD: AMARADA &</u>	
<u>GO'AANADA MAAMUL</u>	
9) Baafin Dacweysan	345
<u>Maxkamada Degmada</u>	
10) Diiwaan Gelin Shirikada Hematrade LTD	347
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
11) Diiwaan Gelin Shirikada Salma Group Company	
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	348
12) Diiwaan Gelin Shirikada KasmaDev LTD	
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	350
13) Diiwaan Gelin Shirikada Tubsan Trading Group LTD	351
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	
14) Diiwaan Gelin Shirikada Isir Construction Company	
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	353
15) Diiwaan Gelin Shirikada Bilkhayr Construction Company	354
<u>Xafiiska Xeer illaalinta Guud</u>	

16) Diiwaan Gelin Shirikada Chico Real State Limited

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

17) Diiwaan Gelin Shirikada Baaburayaan Construction Comapany

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

18) Diiwaan Gelin Shirikada Laba Daryeele Engineering & Architectural Firm LTD

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

19) Diiwaan Gelin Shirikada Hashi Construction Company

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

20) Diiwaan Gelin Shirkada ODI Consultancy Firm

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

21) Diiwaan Gelin Shirkada Horn Economic & Financial Institute (HEFI)

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

22) Diiwaan Gelin Shirikada Golden Cara Investment Limited (GCI)

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

23) Diiwaan Gelin Shirikada Nomad Engineering Company

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

24) Diiwaan Gelin Shirikada Bixin Transport Company LTD

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

25) Diiwaan Gelin Shirikada Hoodaale Livestock Trading Company


Xafiiska Xeer illaalinta Guud

26) Diiwaan Gelin Shirikada AMA Construction Group Company

Xafiiska Xeer illaalinta Guud

27) Diiwaan Gelin Shirikada Arbaax Company Limited

Xafiiska Xeer illaalinta Guud



356

357

359

360

362

363

365

366

368

369

371

372

QAYBTA SHANAAD: OGEYSIISYADA

Sooma bixin

QAYBTA KOWAAD:
XEERARKA BAARLAMAANKA IYO XEER
NIDAAMIYAYAASHA:



QAYBTA LABAAD:
XEER NIDAAMIYAYAASHA IYO
DIKREETOYINKA MADAXWEYNAHA:

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/WM/240-3938/032016
REF.....

31/03/16
DATE.....

- Ku: Wasiirka Wasaaradda Maaliyadda
Hargeysa
- Og: Dhammaan Wasiirrada Wasaaradaha kala Duwan ee Dalka
Hargeysa
- Og: Dhammaan Hay'adaha Madaxa Bannaan ee Dawladda
Hargeysa
- Og: Shir-guddoonka Labada Gole ee Baarlamaanka
Hargeysa
- Og: Xisaabiyaha Guud ee Qaranka
Hargeysa
- Og: Hanti-dhawraha Guud ee Qaranka
Hargeysa

Ujeedo: Joojin Kharashyo



Mudane Wasiir,

Markii aan xog-ogaal u noqday in xaaladda ba'an ee abaaraha dalka ku habsaday ay ka sii darayaan marba marka ka sii danbaysa, isla markaana ay duruufu gaadhay heer ay bilaabantay in ay darxumo iyo diif u dhintaan duur-joogtii, duunyadii la dhaqanayey iyo dadkii noolaa, intuba.

Markii aan arkay xilka iyo mas'uuliyadda gaarka ah ee hoggaamiye ahaan iiga saran aafadan ummadda ku habsatay, in loo baahana-yahay, si looga samato bixiyo in cududda, cuudka iyo caqliga qaranka lagu jeediyo gurmadda abaaraha.

Markii aan arkay in ay Dawladda waajib ku tahay in ay duruufu abaaraha ka geysato gacan weyn ama taageero dhaqaale, taasoo u baahan ku-talo-gal iyo qorshe cusub maadaama aanay hore miisaaniyadda Qaranka ugu jirin.

Markii aan darsay kharashka laxaadka leh ee Dawladda kaga soo kordhay Diiwaangelinta Cod-bixiyayaasha, kaas oo ka baxsan ku-talo-galkii saamigii Xukuumadda la saaray.

Markii aan tixgeliyey warbixintii aad ii soo gudbisay ee farta ku fiiqaysay in ku-talo-galkii Dakhliga Miisaaniyadda Dawladdu hoos u dhac ku yimi xaaladda abaaraha darteed.

Markii aan garwaaqsaday in loo baahan-yahay in la sameeyo kharash dhimis maadaama ay inala soo darseen culaysyadaa badan ee kor ku xusan.

Sidaa darteed, waxaan ku farayaa in aad joojiso kharashyada hoos ku xusan, si loo sameeyo kharash dhimis iyo gunti giijis, laga bilaabo 1-da Bisha April, 2016-ka illaa 31-ka December 2016-ka (kuwaartarka Labaad ee Miisaaniyadda 2016-ka):


1. 25% kharashyada Wasaaradaha, Goleyaasha, khasnadda Guud iyo Hayadaha Madaxa Bannaan ee Miisaaniyadda 2016-ka ku soo arooray.

F.G: Kharashyadaa waxaa ka reebban:



- Kharashka Nabadgelyada
 - Kharashka Gurmada Ciidanka
 - Kharashka Magaha
 - Kharashka Lama filaanka iyo Gurmada
 - Kharashka Isticmaalka Nalka iyo Biyaha
 - Kharashka Diiwaangelinta Dadweynaha
 - Kharashka Iibsiga Wargeysyada iyo Buugaagta
 - Kharashyada yar yare ee Xafiisyada Dawladda
 - Kharashka Stationery-ga
 - Saamiga Dawladda ee Mashruuca JPLG
 - Fuel Levy-ga Waddooyinka
 - Dhismaha Mashruuca Waddooyinka ee Export Livestock Levy
 - Kharashka kabka Gobollada Bariga (Xisaabta 2% ee Gobollada Bari)
 - Kharashka Daabacaadda Dokumentiyada, lacagaha, liisammada gaadiidka iyo iwm
2. 10% kharashka Ciidammada kala duwan, marka laga reebo:
- Raashinka iyo wixii la mida.
 - Iibsiga Qalabka Ciidammada.
3. 100% kharashka dhismayaasha cusub iyo mashaariicda horumarka ee Miisaaniyadda 2016-ka.
4. 30% kabka Dawladaha Hoose.
5. 30% kharashka Kaalmooyinka Guud.
6. 30% kharashka Bixinta Deymaha Qaranka ee sannadka 2016-ka, baaqigana lagu daro miisaaniyadda sannadka 2017-ka.

7. 30% Bilasha Deymaha taagan ee Wasaaradaha, baaqigana lagu daro Miisaaniyadda sannadka 2017-ka.
8. 30% Dhismayaasha socda ama dhammaaday, baaqigana lagu daro Miisaaniyadda sannadka 2017-ka.
9. 20% kharashka Kaydka Qaranka.
10. 10% kaalmooyinka kale ee Dawladda.
11. Iibsiga gaadiidka cusub.



Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**
THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3939/042016

DATE....03/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0624/042016


Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

- Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;
- Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihiin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;
- Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta jagada Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Ka Fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;



Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Boos Mire Maxamed, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Wasiiru-dawlaha Wasaaradda Maaliyadda ee Jamhuuriyadda Somaaliland.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF



SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3940/042016

DATE....03/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0625/042016

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Gobolladu u leeyihiin Dhismaha Qaranka;


Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka Daad-madheedh;

Markuu Ka Fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu Ku Qancay:

In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;



Wuxuu go'aansaday

In Mudane, Farxaan Xasan Cabdi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Daad-madheedh ee Jamhuuriyadda Soomaaliland.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  **SOMALILAND**

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3941/042016

DATE....03/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0626/042016

Beddel

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

Qodobka 110aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:

Ahmiyadda ay Guddoomiyayaasha Goballadu u leeyihiin dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday:

In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiyaha Gobolka Selel;

Markuu Ka fiirsaday:

Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo

Markuu ku Qancay:

In uu hanan karto xilkan loo
magacaabay;



Wuxuu Go'aansaday

In Mudne, Axmed Maxamed Xaashi, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiyaha Gobolka Seel ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3942/042016

DATE....03/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0627/042016

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay:

Qodobka 90aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Arkay:

Qodobka 110aad ee Dastuurka
Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey:

Ahmiyadda Ay
Guddoomiyayaasha Goballadu u
leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Aqoonsaday: In baahi loo qabo buuxinta jagada Guddoomiye ku-xigeenka Gobolka Saaxil;

Markuu Ka fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;



Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Maxamed Cismaan X. Axmed (Indho Balac), laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Guddoomiye ku xigeenka Gobolka Saaxil ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3943/042016

DATE....03/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0628/042016

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Farqadiisa 3aad, ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda ay Guddida Qandaraasyada Qaranka u leeyihiin Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo Magacaabidda Xubin katirsan Guddida Qandaraasyada Qaranka;

Markuu Ka fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Axmed Xaashi Cali, laga bilaabo taariikhda maanta uu ahaado Xubin ka tirsan Guddida Qandaraasyada Qaranka ee Jamhuuriyadda Somaliland.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3945/042016

DATE....03/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0629/042016

Magacaabid

Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Faqradiisa 2aad ee Dastuurka Jamhuuriyadda Somaliland;

Markuu Tixgeliyey: Ahmiyadda Weyn ee ay Wasaaraduhu u leeyihin Dalka iyo Dhismaha Qaranka;

Markuu Arkay: In baahi loo qabo buuxinta
Jagada Wasiir ku-xigeenka
Wasaaradda Gaashaandhigga ee
Jamhuuriyada Somaliland;

Markuu Ka fiirsaday: Kartidiisa, aqoontiisa iyo
hufnaantiisa shaqo;

Markuu ku Qancay: In uu hanan karo xilkan loo
magacaabay;

Wuxuu Go'aansaday

In Mudane, Maxamuud Warsame Jaamac, laga bilaabo
taariikhda maanta uu ahaado Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda
Gaashaandhigga ee Jamhuuriyadda Somaliland

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

REPUBLIC OF  SOMALILAND

THE PRESIDENT

JSL/M/XERM/249-3965/042016

DATE....24/04/16

XEER MADAXWEYNE Lr: 0631/042016

Cafis Madaxweyne **Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland**

Markuu Arkay: Qodobka 90aad, Xubintiisa 5aad,
ee Dastuurka Jmhuuriyada
Somaliland;

Markuu Arkay: Qodobka 149aad ee Xeerka
Ciqaabta Guud;

Markuu Latashaday:

Mas'uuliyiinta ay arrintani
khusayso;

Markuu Tixgeliyey:

Codsiga Cafiska ah ee Wasirka
Wasaaradda Arrimaha Gudaha,
Wasiiru-dawlaha Wasaaradda
Madaxtooyada iyo codsiga
Guuleed Xasan Dirir;



Wuxuu go'aansaday

In laga bilaabo taariikhda maanta uu cafis gaar ahaaneed u fidiyo Guuleed Xasan Dirir oo qarannimada Somaliland ka soo hor-jeeday in muddo ah.

Allaa Mahad Leh,
Axmed Maxamed Silanyo
Madaxweynaha Jamhuuriyadda Somaliland

QAYBTA SADEXAAD:

**DIKREETOYINKA, WAREEGTOOYINKA,
AMARADA & XEER NIDAAMIYAYAASHA
WASIIRADA, IWM:**

QAYBTA AFRAAD:

AMARADA & GO'AANADA MAAMUL

JAMHUURIYADA  SOMALILAND

MAXKAMADDA DEGMADA HARGEYSA

Hargaisa District Court

MDH/J/DML/17/2016

HARG:-04/04/2016

Ku:- Radio Hargaisa.

Ku: Wargeys-Yada Madaxa Banaan Harg.

Og:- Garyaqaanka Guud Ee Qaranka Jsl Harg.



UJ:- Baafin Dacweysan.

Maxkamadda Degmada Hargeysa Waxay Baafinaysaa Dacweysanta Magaceedu yahay **Nimco Cabdiraxmaan Maxamed** In ay ku timaado Mudo Dhan **(15)** Cisho gudahood ah Oo Ka Bilaabmata Marka Laga Baahiyo Idaacada Radio Hargaysa Iyo Wargaysyada Madaxa Banaan. Ee Dalka.

Waxa Lagu Amrayaa Dacweysanta in ay ku timaado Mudadaa Loo Qabtay.

Hadaba Hadii Dacweysantu ku Iman Waydo Mudada Loo Qabtay Maxkamaddu Waxay ka Qaadi Doontaa Talaabo Sharciga Waafaqsan, Waana La Dhagaysan Doona Dacwada Sida Uu Dhigayo Qod:-204 XHM.

Sh.Abu-Rajaa X. Maxamuud Abokor

Garsooraha Maxkamada Degmada Hargaisa.

Maxamed Axmed Cabdi

Kaaliyaha Maxkamada Degmada Hargaisa

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/73/2016.

24/02/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.



Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyada Somaliland oo u xil saaran Diiwan galinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha .

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HEMATRADE LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad Qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, samiyadooduna ay suganyihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HEMATRADE LTD, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada),** shaqadeeduna tahay ganacsi Guud(General Trading), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 24/02/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/74/2016.

23/03/2016

Hargeysa

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Maga ceedu yahay, SALMA GROUP COMPANY

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland,

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwaan Geliyey



Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **SALMA GROUP COMPANY**. **Astaanteeduna tahay:-** (faras magaca shirkadu ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay Soo Dejinta allaabooyinka (**Import**), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargaysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 23/03/2016.

Allaa Mahad Leh

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/75/2016.

27/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, KasmDev LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay sexeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **KasmDev LTD, Astaanteeduna tahay:- (magaca Shirkada)**, shaqadeeduna tahay Bixinta Adeegyadda tallo bixinta (Consultancy), xarunteeduna tahay Magaaladda hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/03/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/76/2016.

27/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, TUBSAN TRADING GROUP LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **TUBSAN TRADING GROUP LTD, Astaanteeduna tahay:-** (Xarafka T oo dul marsan xarfaha kale ee magaca shirkada), shaqadeeduna tahay soo Dejinta Allaabooyinka (Import) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/03/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/77/2016.

27/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Maga ceedu yahay, ISIR CONSTRUCTION COMPANY

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **ISIR CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (dhisme dabaq ah magaca shirkaduna ku hoos qoran yahay) shaqadeeduna tahay Dhismaha (**Construction**) xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 27/03/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka.

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/78/2016.

04/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.



(Sole Proprietorship)

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, **BILKHAYR CONSTRUCTION COMPANY**

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **BILKHAYR CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Guri Magaca shirkadu ku dul Wareegsan Yahay), shaqadeeduna tahay Dhismaha **(Construction)**, xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/79/2016.

06/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, CHICO REAL STATE LIMITED, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11 (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **CHICO REAL STATE LIMITED, Astaanteeduna tahay:-** (Guryo magaca shirkadu ku hoos qoran yahay) shaqadeeduna tahay kiraynta iyo iibinta Guryaha (REAL STATE), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 06/04/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/80/2016.

04/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BAABURAYAAN CONSTRUCTION COMPANY

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **BAABURAYAAN CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Dhismayaal magaca shirkaddu ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay Dhismaha (**Construction**), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 04/04/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/81/2016.

30/03/2016

Hargeysa.



Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, LABA DARYEELE ENGINEERING & ARCHITECTURAL FIRM LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11 (2) (a) Somaliland Company law.


Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, LABA DARYEELE ENGINEERING & ARCHITECTURAL FIRM LTD, **Astaanteeduna tahay:-** (dhisme laba daryaale ah,

magaca Shirkaduna ku hoos qoran yahay), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 30/03/2016



Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND
XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/82/2016.

10/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

(Sole Proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HASHI CONSTRUCTION COMPANY

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer N0.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey.y

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HASHI CONSTRUCTION COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (magaca shirkadda), shaqadeeduna tahay Dhismaha (**Construction**), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/83/2016.

10/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, ODI CONSULTANCY FIRM, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin xeerka Shirkadaha Xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwaan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **ODI CONSULTANCY FIRM, Astaanteeduna tahay** (magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay la talinta xaga tababarada (Consultancy Firm), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 10/04/2016

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND



XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/84/2016.

11/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta shirkadaha

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee xeer shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay HORN ECONOMIC & FINANCIAL INSTITUTE, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin xeerka Shirkadaha xeer No.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:-

Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.



Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HORN ECONOMIC & FINANCIAL INSTITUTE (HEFI), Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada) shaqadeeduna tahay la talinta xaga Dhaqaalaha (Consultancy Service), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 11/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/85/2016.


11/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed.

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.



Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, GOLDEN CARA INVESTMENT LIMITED (GCI), oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **GOLDEN CARA INVESTMENT LIMITED (GCI)**, Astaanteeduna tahay:- (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 11/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL



JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/86/2016.

10/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.
(Sole proprietorship)

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, NOMAD ENGINEERING COMPANY

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yahay Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland.

Markuu arkay:- Saxeexa saamilaha Shirkaddu uu saxeexay sida uu qabo qodobka

11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer
Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey



Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay
Shirkada magaceedu yahay, **NOMAD ENGINEERING
COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Guri Magaca
Shirkadu ku dul wareegsan yahay), shaqadeeduna tahay
Dhismaha **(Construction)**, xarunteeduna tahay
Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay
taariikhdu tahay 10/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  **SOMALILAND**

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/87/2016.

30/03/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda
Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay: - Qodobadda 11aad ee Xeer
Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, BIXIN TRANSPORT COMPANY LTD, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay: - In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, Saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, BIXIN TRANSPORT COMPANY LTD, **Astaanteeduna tahay:-** (Gaadhi Noah ah, magaca shirkaduna ku hoos yaalo), shaqadeeduna tahay bixinta adeegyadda socdaalka (Transport), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 30/03/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/88/2016.

13/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, HOODAALE LIVESTOCK TRADING COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **HOODAALE LIVESTOCK TRADING COMPANY, Astaanteeduna tahay:** (Magaca Shirkada oo uu hangool ku dhex jiro), shaqadeeduna tahay ka ganacsiga xoolaha (livestock Trading), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 13/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/89/2016.

16/04/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeedo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelinta Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Magaceedu yahay, AMA CONSTRUCTION GROUP COMPANY, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay **AMA CONSTRUCTION GROUP COMPANY, Astaanteeduna tahay:-** (Magaca Shirkada), shaqadeeduna tahay Dhismaha (Construction), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 16/04/2016.

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL

JAMHUURIYADDA  SOMALILAND

XAFIISKA XEER ILAALINTA GUUD

XIG/JSL/90/2016.

18/4/2016

Hargeysa.

Ku: Cidda Ay Khuseyso.

Ujeeddo:- Diiwan Gelin Shirkadeed

Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud ee Qaranka Jamhuuriyadda Somaliland oo u xil saaran Diiwan Gelin Shirkadaha.

Markuu arkay:- Qodobadda 11aad ee Xeer Shirkadaha, kaas oo Awood u siinaya Xafiiska Xeer Ilaalinta Guud in ay Diiwan geliso Shirkadaha.

Markuu arkay: - Xeerka Shirkadda Maga ceedu yahay, ARBAAX COMPANY LIMITED, oo ay ku cad yihiin xubnaha Shirkaddu, sida ku Cad qodobka 11aad (2) (a) Somaliland Company law.

Markuu Arkay:- In ay Saamiga Shirkaddu waafaqsan yihiin Xeerka Shirkadaha Xeer NO.25/2004 Company Act of Somaliland, saamiyadooduna ay sugan yihiin.

Markuu arkay: - Saxeexa saamilayda Shirkaddu ay saxeexeen sida uu qabo qodobka 11aad Xubintiisa 3aad ee Xeer Shirkadaha.

Wuxuu Diiwan Geliyey

Inay Xafiiskan si Sharci ah uga diiwan gashan tahay Shirkada magaceedu yahay, **ARBAAX COMPANY LIMITED, Astaanteeduna tahay:-** (Map-ka Aduunka magaca shirkada hoos yaalo), shaqadeeduna tahay soo dejinta iyo dhoofinta allaabooyinka, sida kallunka (Import and Export), xarunteeduna tahay Magaaladda Hargeysa, laga bilaabo maanta oo ay taariikhdu tahay 18/04/2016

Allaa Mahad Leh.

(Xasan Axmed Aadan)

Xeer Ilaaliyaha Guud ee Qaranka JSL